Sidii maxkamadda loogu tusilaa dhibta in ay run tahay way adkaan kartaa. Haddii labadda qof qiran dhibtaa way wanaag sanaan lahayd in qof sadexaad arkaayo dhibtaas. Haddii mar hore aad lasooxiriirtay booliska ama sooshalkaagga way kucaawin kartaa markii arinta lageeyo maxkamadda. Markii lafiirinayo heer ay gaarsiisan tahay dhibta dhibanaha dhibtiisa wuxu kusoo gudbinkaraa cadayn dhaqtar, dhib teknikaal ah oo uu kaydiyay, markhaanti tusaale ahaan, deriska ama dad aad meel kawadda shaqaysaan markhaantigooda.

Wixii caawimaad sharciyadda ah waxa kusiin kara caawiyayaalka sharciga ee dowladda, sharciyaqaanka guud iyo qareenadda kale. Xafiiska caawimaadda cadaaladda waxaa ka ogaan kartaa inaad xaq uleedahay garyaqaan bilaash ah iyo inkale.

Maxakamaddu go'aan bay ka gaari kartaa arrinta u soo dhawaansho la'aanta, xitaa haddii qofka laga andacoonayo uu diido inuu maxakamadda yimaado.
Xukunka u soo dhawaansho la'aantu wuxuu dhaqangeleyaa, Isla marka go'aanka la gaaro.

Haddii ay dhacdo mustaqbalka in laga kaaftoomo usoodhawaanshala'aanta, maxakamadda ayaa laga dalbadaa in go'aanka u soo dhawaansho la'aanta la baabi'iyo.
Dadka arrintu khusaysaa iskood uguma heshiin karaan, in u soo dhawaansho la'aanto dhammaato.

Jebinta u soo dhawaansho la'aanta

Jabinta usoodhawaanshala'aanta waa danbi waxayna leedahay abaalmarinteedda. **Xukunkeeduna wuxuu noqkaraa ganaax ama ugu badnaan hal sano oo xarig ah.** Jabintaana waxay hoos imaamaysaa xafiiska xeer ilaalinta guud, xafiiskaasna baa sharci jabiyaha maxkamadda lafuulaaya.

U soo dhawaansho la'aanta la xukumo oo dhan waxaa la geliyaa diwaan dadka la geliyo oo gaar ah oo boolisku leeyahay.

Booliska baa ilaalinaya usoodhawaanshala'aanta qofkii jabiyana haddii loobaado way jajuubi karaan. Qofkii loo xukumo in aan loosoodhawaan karin badbaadadiisa waa lasugay markii booliska lawacdana sharci jabiyahana waalaxirayaa waana la waraysanayaa.

Lambarka heeganka ee booliska 112

SIDATAN SUUBI

- haddii dhib ama hanjabaa luguu gaystay laxiriir booliska
- booliska yaad ka codsan kartaa u soo dhawaansho la'aan ku meel gaar ah
- sidoo kale waxaaad caawimo weydiisan kartaa shaqaalaha sooshalka ama hay'adaha kale ee dadka talooyinka siiya
- haddii loo baahdo waxaad caawimo ahaan u isticimaali kartaa aqoonyahanno
- marka laguu ogolaado u soo dhawaansho la'aanta, adiguna iskaa uga feker sidii aad badbaadadaada u sii kordhin lahayd, tusaale ahaan sida sakatuurada ood iska beddesho iwm.
- kataxadar in aan lajabin sharcigga usoodhawaanshala'aanta
- **haddii a jebiyo sharciga u soo dhawaansho la'aanta, si dhakhso ah booliska ugu sheeg**
- **ha ka cabsan inaad badbaadiso qoyskaaga iyo naftaada !**

Talosiinta iyo caawimada

Mas'uuliyiinta dowladda ee hoos ku qoran baad ka heli kartaa talo iyo hagid ku saabsan arrimaha u soo dhawaansho la'aanta.

- mas'uuliyiinta booliska
- mas'uuliyiinta sooshalka

Ururada hoos ku qoran baad ka heli kartaa talo iyo hagid ku saabsan arrimaha u soo dhawaansho la'aanta.

- Gurigga badbaadadda **www.turvakoti.net**
- Heeganka dhibanayaasha **www.rikosuhripaivystys.fi**
  Telefoonka caawimaadda **0203 16 116** isniin-talaado13-21 arbaco-jimce 17-21
  Talasiin qareenadda tel. **0203 16 117** isniin-khamiis 17-19
- Xarunta kufsigga caawimaada dumarka Tukinainen **www.tukinainen.fi**
  Telefoon lacag la'aan ah oo heegan ah oo dhibaatooyinka degdegga ah. **0800 97899** isniin-khamiis 9-17,
  jimce-axad, feestooyinka iyo maalmaha feestooyinka ka horeeya 17-24
  Heganka qareeno lacag la'aan ah, tel. **0800 97 895** isniin-khamiis 14-17
- Ururka arrimaha dumarka **www.naistenlinja.com**

U soo dhawaansho la'aan

Wasaaradda Cadaaladda
www.om.fi

Wasaaradda Arrimaha Gudaha qaybta booliska
www.poliisi.fi

Sharciga ku saabsan u soo dhawaansho la'aanta ujeedada laga leeyahay waa in dembiyada laga hortago oo la kordhiyo fursadaha wax lagaga qaban karo dembiyada dhibaatooyinka khatarta ah leh. U soo dhawaansho la'aanta macneheedu waa, in si loo badbaadiyo qofka naftiisa, caafimaadkiisa, xornimadiisa ama nabadgelyadiisa, qof kale lagu xukumi in aanu qofka la badbaadinayo la soo xiriirin. U soo dhawaansho la'aanta waxaa sidoo kale lagu xukumi karaa qofka, xitaa haddii qofka la badbaadinayo iyo kan laga badbaadinayaa isku guri ku nool yihiin.

Yaa codsan kara u soo dhawaansho la'aanta?

Badanaaba dhacdooyinka loo isticmaalo u soo dhawaansha la'aanta waa ninkaagii/ naagtaadii hore ama kula noolahaagii hore oo loodiidaayo inuu ku lasoo xiriiro ama inuu kuu yimaado ama qof qaangaara oo cadaadinaya waalidkii oo loo diidaayo in uu la soo xiriiro ama soo agmaro waalidkiis. Sidoo kale u soo dhawaansho la'aanta waxaa lagu badbaadin karaa qofka dacwo maxakamadda lagu qaadayo markhaati ka ah.

Xeerarka u soo dhawaansho la'aanta ee qoyska dhexdiisa waxaa kaloo la isticimaali karaa, haddii qofka la badbaadinayo iyo kan laga badbaadinayaa ay guri ku wada nool yihiin iyagoo aanu xiriir qoys ahaaneed ka dhaxayn. U soo dhawaansho la'aantu waa suuragal, haddii waalidku dhibaato dagaal kala kulmo ilmo qaangaar ah oo uu dhalay oo guriga kula nool.

U soo dhawaansho la'aanta waxaa codsan kara qof kasta oo u arka in qof kale hanjabaad ama dhibaato ku hayo.

In qof u soo dhawaansho la'aan lagu xukumo waxaa iyana codsan kara xeerilaaliyaha, booliska iyo shaqaalaha

sooshalka, haddii qofka dhibaatada lagu hayaa uu ka cabsanayo ama aanu awoodin inuu u soo dhawaansho la'aanta dalbado.

Sidee baa loo codsadaa u soo dhawaansho la'aanta?

Haddii luguu hanjabay aadna u aragtid in ay ku caawinayso sharcigga u soo dhawaansho la'aantu waxaad talo iyo caawimo ka heli kartaa booliska, masuuliyiinta sooshalka, xeerilaliyaha ama ururadda iskaa wax u qabsashadda.

U soodhawaansho la'aanta waxaa laga codsadaa booliska ama maxkamadda, codsigaas oo ah qoraal ama oraah. Codsiga markii aad codsanaysid waa in aad sheegtaa waxyaabahan soo socda

- hanjabaadda ama khashkhashaadda aad la kulantay ama aad la kulmaysid waxay tahay
- yaa kuu hanjabaya ama ku khashkhashaya
- fikradda aad ka qabtid inay khashkhashaadaasi sii socon doonto ama heer uu gaaarsiisnaan karo danbiga ay keeni karto hanjabaadaas
- arintaas markhaati ama cadeymo ma leedahay.

Waa muhiim inaad qortid dhacdooyinku sii ay u dhaceen, kuna qortid codsigga waxaa kale oo codsigga kusoo qoreysaa markhaatiyaasha cinwaanadoodda iyo telefoonadoodda

Haddii nabar luguu gaystey u tag dhakhtar oo cadayn ka soo qaado.

U soo dhawaansho la'aanta ku meelgaarka ah ee isla markiiba dhaqangeleysa waxaa xukumi kara mas'uuliyiin u xilsaaran inay qof qabtaan oo xiraan, kuwaas oo ah saraakiisha booliska ama xeerilaaliyaha ama maxakamadda degmada.

U soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisa ah marka ugu horaysaa inta badan waa inay noqotaa mid ku meelgaar ah oo isla markiiba dhaqangeleysa oo ah mid uu boolisku go'aankeeda gaarayo. Sidaas waxaa la yeelaa tusaale ahaan, markuu boolisku qofka dagaalka samaynaya ama si dagaal leh u dhaqmaya guriguu deggen yahay si khasab ah uga kexeeyo oo saldhigga booliska la geeyo, ayna aad ugu badan tahay inuu qofku marka la soo daayo ka dib dembi dagaal ah sameeyo

Waxyaabaha ay u soo dhawaansho la'aantu ka kooban tahay

U soo dhawaanshola'aanta aasaaska ah qofka lagu xukumay lama kulmi karo qofka labadbaadinayo, si kalana ulamana soo xiriiri karo, iskumana deyi karo inuu la soo xiriiro. Lamana ogola inuu qofka la badbaadinayo dabagalo oo dusha ka ilaashado.

U soo dhawaansho la'aanta balaaran macneheedu wuxuu kaloo yahay, in qofku aanu joogjoogi karin meelaha qaar, sida meelaha u dhow guriga uu qofka la badbaadinayaa deggen yahay, guriga uu fasaxa u tago, meesha uu ka shaqeeyo ama meel kale oo kuwaas u dhiganta oo la joogjoogo oo maxakamadu si gaar ah u magacawday.

Qofka lagu xukumay u soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisa ah waxaa khasab ku ah inuu ka baxo guriga ay isaga iyo qofka la badbaadinayaa wada deggen yihiin, lamana ogola inuu guriga dib ugu soo noqdo.
Sidoo kale lama kulmi karo qofka la badbaadinayo, lamana soo xiriiri karo. Waxaa kaloo iyana mabnuuc ah in qofka la badbaadinayo la dabagalo oo korka laga ilaashado. U soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisu waxay kaloo noqon kartaa mid **balaaran,** oo ah in aanu qofku joogjoogi karin meelo kale oo gaar ah, tusaale ahaan sida guriga labada qof ka dheeya meelaha u dhow.

U soo dhawaansho la'aanta waxaa la xukumaa iyadoo mid walba gaarkeeda loo eegayo, heerka ay noqonaysaana waa inuu ku xiran yahay hadba sida ay lagama maarmaan u tahay. U soo dhawaansho la'aantu ma diideyso wada xiriiridda macnaha ku dhisan. Tusaale ahaan xitaa iyadoo u soo dhawaansho la'aantu jirto aya wada xiriiridda waa la ogol yahay ,haddii ilmo labada qof ay isu dhaleen degdeg u jirado.

Marka la gaarayo go'aanka ku saabsa u soo dhawansho la'aanta, waa in la tixgeliyaa waxyaabaha la sii og yahay ee imaan kara. Sida kulamada la xiriira la kulanka ilmaha ama wada xiriirida loo baahan yahay si hantida loo qaybsado, waxaa la qabanqaabin karaa iyadoo shaqaalaha maamulka ee sooshalku qabanqaabinayaan ama uu qof dhexdhexaad ah goobjoog yahay.

U soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisa ahi shaqo kuma darsanayso waajibaadka dhaqaale ee labada qof ka dhexeeya (tusaale ahaan, bixinta ijaarka), qaybinta guri haday wada leeyihiin ama arrimaha xiriirka ijaarka u saabsan iyo qaybsashada alaabta guriga taalla.

U soo dhawaansho la'aantu wax saamayn sharci ahaan ah kuma laha cidda masuul ka noqonaysa ilmaha labada qof ay isu dhaleen, xuquuqda la kulanka iyo masruufidiisa. La kulanka ilmaha waa in si gaar ah looga heshiiyaa

Muddada ay u soo dhawaansho la'aantu soconayso

U soo dhawaansho la'aantu waxay socotaa wakhtiga ay maxakamaddu xukunto inay ku eg tahay, laakiin ugu badnaan hal sano, haddiise loo baahdo u soo dhawaansho la'aanta waa la sii wadi karaa. Si loo sii wado u soo dhawaansho la'aanta waxaa loo baahan yahay in la codsado maxakamadduna go'aan ka gaarto.

U soo dhawaanshola'aanta qoyska dhexdiisa waxaa qofka lagu xukumi karaa ugu badnaan saddex bilood. Muddada ay qaadanaysana dacwo walba gaarkeedaa looga fekeraa. Haddii loo baahdo u soo dhawaansho la'aanta dib baa loo cusbeyniisiin karaa ugu badnaan saddex bilood oo kale.

Maxakamadda iyo arrinta u soo dhawaanshola'aanta

Codsiga u soodhawaansho la'aanta maxakamadda ayaa si degdeg ahaan ah go'aan uga gaarta. Arrintaana waxaa lugu falanqeeyaa maxkamadda sida danbiyada oo kale, waxaana la falanqeeyaa arrinta lugu andacoonayo iyadoo la dhagaysanayo labadda qof ee arrintu kursaabsan tahay iyo markhaantigoodda.
U dhawaansho la'aanta markii la go'aaminaayo waxaa la eegayaa heerka danbiga iyo dhibtu gaarsiisan yihiin, markii la dhagaysto sheekadda dhibanaha iyo markhaatiggaba. Sababaha keenikara u soo dhawaansho la'aanta waxay noqon karaan qalalaaso dhacay, laakiin mar walba ma sababto u soo dhawaansho la'aan. Sidoo kale haddii dhibanaha loogu hanjabay gurigiisa, shaqadiisa, ama meelaha lugu kulmo waxay noqon kartaa sabab dhibanaha loosiin karo u soo dhawaansho la'aan. Sidoo kale haddii dhibanaha si joogto ah loogu hanjabo telefoon, waraaq iwm. waxay keeni karaan in qofka dhibka geysanaya lagu xukumou soo dhawaansho la'aan

Shuruudaha u soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisu ad bay u adag yihiin

Maadaama ay noqonayso in qofka gurigii uu deggenaa laga saarayo, taas oo macneheedu yahay in sida qofka xuquuqdiisa loo daakhilayaa ay ka weyn tahay tan u soo dhawaanshola'aanta caadiga ah, shuruudaha loo baahan yahay si qofka loogu xukumo u soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisa way ka culus yihiin shuruudaha u soo dhawaanshola'aanta cadiga ah

U soo dhawaansho la'aanta waxaa la xukumi karaa oo keliya haddii uu jiro dembi loo geysanayo qofka noloshiisa, caafimaadkiisa iyo xornimadiisa iyo si looga hortago haddii ay jirto cabsi ah in dembi noocaas ahi dhici doono. U soo dhawaanshola'aanta lama xukumo, haddii dembigu yahay mid xasilooni la'aan ama qashqashaad ah. Mida kale waxaa loo baahan yahay, inay si aad ah u muuqato, in haddii u soo dhawaansho la'aanta qoyska dhexdiisa la xukumin ay ay keenayso, in dembiga kor lagu soo sheegay dhici doono.